

Ha daahin daryeelka xaaladaha degdegga ah

Dadka reer Minnesota, haddii ay idin qabsato xaalad caafimaad oo degdeg ah, isla markaaba waca 911.

Ilaa hadda si fiican ayaad uga qabqaadanaysaan hoosu dhigitaanka faafida COVID-19 guryahana waad joogtaan

Hase yeeshee, xog rasmi ah ayaa muujinaysa inay dad ka yar intii hore oo qaba calaamadaha xanuunka faaligga iyo wadne istaaqa ay wacayaan 911 ama booqanayaan qolalka gargaarka degdegga ah.

Waxaan rabnaa inaan hubino in reer Minnesota aanay ka daahayn helitaanka daryeelada caafimaad ee muhiimka iyagoo ka cabsanaya xanuunka COVID-19.

Nidaamkayaga daryeelka caafimaadku waa aamin, wuxuuna diyaar u yahay daaweenyta bukaannada ay la soo gudboonaadaan xaaladaha caafimaad ee degdega ahi.

Haddii ay ku qabsato xaalad degdeg ah oo caafimaad, Isla markaaba wac 911.

Taas waxa ka mid ah dhiig bax aan joogsanaynin, neefta oo ku qabanayso, miyir beel kedis ah, ama astaamaha faaliga ama wadne istaaga.

Helitaanka daryeelka degdega ah ayaa badbaadin kara noloshada.

Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

10/27/20

Don't Delay for Medical Emergencies (Somali)

To obtain this information in a different format, call: 651-201-4989